



# Tusmada Ogolaanshaha Guud ee Dhismaha:

## Tubta lagu raacaayo Sharciga

Goobaha dhismuhu waa inay ku dhaqmaan sharciyada Federaalka, Gobalka, iyo Deegaanka ee difaacaaya caafimaadka bulshooyinkeena ayagoo ka hortagaaya wasaqaynta biyaha. Gobalka California ayaa shaqooyinka ku sharciiyeya [Ogolaanshaha Guud ee Dhismaha \(CGP\)](#), kaasoo Laanta Biyaha ee San Diego ay fuliso. **Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan goobtaada; keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.** Ismaamulka San Diego ayaa abuuray tusmo, ay ku jiraan talaabooyinka iyo lifaaqyada webseedyada, si looga taageero goobaha dhismaha ku dhaqanka CGP-ga Gobalka California.



## TALAABADA 1 AAD

GO'AAMI HADDII GOOBTAADA DHISMAHA AY QASAB TAHAY INAY KU DHAQANTO CGP:

### ▶ Waa qasab inaad ku dhaqanto CGP haddii:

- Mashruucu uu [saamaynaayo](#) 1 ekar ama ka badan (saameynta waxaa ku jira dhul qodista, dhir jarista, burburinta, qufida, ama abuurista tuurarka IYO aaga kaydka/bud-dhiga haddii ay ¼ mayl in ka yar u jirto goobta mashruuca). Mashruucyada caadiga ah, ka fiiri [Qaybta II.A](#). Mashruucyada keliga ah ee dhulka hoostiia iyo kuwa kore (LUPs), ka fiiri [Qaybta II.C](#) iyo [Qaybta I.B ee Lifaaqa E.2](#). *Halimbawa: 0.8-akre ng may nagambalang parcel area + 0.3-akre ng offsite storage yard ay higit sa isang akre.*
  - Saameynta dhulka kuma jirto [dayactirka caadiga ah](#), sida dib u habaynta aaga la maro ama badelida saqafka dhismaha horey u jiray.
- Mashruuca ayaa saameynaya **wax kayar 1 ekar**, laakiin wuxuu qayb ka yahay [qorshaha wayn ee guud ee hormarinta ama iibka](#) kaasoo ku fadhiya wadarta guud dhul dhan 1 ekar ama ka badan.



Mashruucyada u dhexeeya 1-5 ekar ayaa u qalmi kara [Shardi Dhaafka Nabaad Guurka Roobka ee Dhismaha \(Qaybta III.D\)](#).

- ▶ **Haddii la go'aansho in mashruucaaga uuan qusayn CGP, halkaan ku jooji. Haddii mashruucaagu u dhexeeyo 0.75 ilaa 0.99 ekar, waxaa lagu dabihi karaa sharciga CGP. La xiriir [Gudiga San Diego](#) si aad u xaqiijiso kahor biloowga shaqada.**



## TALAABADA 2 AAD

DIYAARI OO SOO GUDBI CODSIGAAGA CGP:

### ▶ Haddii mashruucaaga ay qasab tahay inuu ku dhaqmo CGP:

- Qofka [Sharciyan masuulka ka ah \(LRP\)](#) ayaa laga doonayaa inuu soo gudbiyo codsiga Ogeysiiska Ujeedada (NOI), [qarashka ogolaanshaha](#), iyo dhammaan dukumiintiyada muhiimka ah oo lagu soo gudbiyo [smarts.waterboards.ca.gov](#) (SMARTS) si loo ansixiyo kahor intaan dhismuhu bilaaban. Gudiga Biyaha ee Gobalka ayaa soo saari doona lambarka aqoonsiga gaarka ah oo la yiraahdo lambarka [WDID](#) marka la ansixiyo.
  - Keento Abuuraha Qorshaha Kahortaga Wasaqaynta Biyaha Daadka oo Shahaado haysta (SWPPP) (QSD) si uu u diyaarso [SWPPP](#) iyo [Go'aaminta Heerka Khatarta](#).
  - Soo gudbi macluumaad dheeri ah (tusaale, xisaabaadka kadib dhismaha iyo qorsheyaasha) marka ay quseeyaan. Arag [Lifaaqa D.2](#) si aad u aragto mashruucyada caadiga ah iyo [Lifaaqa E.2](#) mashruucyada LUPs.

Isticmaal aalada soo socoda ee baarista si aad ugu darto shaqaale aqoon uleh kooxdaada:  
<https://www.owp.csus.edu/qsd-lookup.php>



CASQA QSD iyo Raadinta QSP

Raadinta Dadweynaha

**Kaliya hal magac, lambar shahaado ah, ama sib code ayaa loo baahan yahay si loo raadiyo.**

Shahaado

Magaca Dambe

Lambarka Shahaadada

Koodhka sibka  Miles

CGP 2022 la tababaray

Raadi




## TALAABADA 3 AAD DHAQAN GELIN SHURUUDAHA CGP:

### ▶ SWPPP waa tubtaada buuxinta shuruudaha CGP. Dhaqan geli SWPPP adoo sameeynaya waxyaabaha soo socda:

- Soo dhaji boorka muuqda ee lambarka mashruuca WDID. Dhig SWPPP iyo warbixinada kormeerka goobta kana dhig kuwii ugu danbeeyay (nuqullada elektarooniga ah waa la ogol yahay).
- Si sax ah u dhaqan geli dhammaan Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka (BMPs) sida lagu qeexay SWPPP iyo sida uu kaa doonaayo kormeeraha ku dhaqanka sharciga biyaha daadka sida xakamaynta nabaad-guurka, xakamaynta jayga, iyo maareynta wasaqda ([Lifaaqa D](#) mashruucyada caadiga ah iyo [Lifaaqa E](#) mashruucyada LUPs).
  - Dhammaan natiijooyinka sanbalka waa in loo diraa SMARTS ugu danbayn 10 maalmood kadib dhamaystirka hawsha biyo dhaca, iyo dhammaan natiijooyinka shaybaarkana waa in loogu diraa SMARTS 10 maalmood gudahood kadib marka ay soo baxaan.
- Haddii mashruucu qaadanaayo in ka badan intii la filaayay ama goobtu iska badesho wixii lagu soo gudbiyay SMARTS si loo helo ku dhaqanka CGP, u soo dir [Isbeddelka Macluumaadka \(COI\)](#) SMARTS **ugu yaraan 14 maalmood** kahor inta aan isbeddelkau dhaqan gelin.
- Haddii mulkiyada mashruucu isbeddesho, soo gudbi [Ogeysiiska Joojinta \(NOT\)](#) kahor iibinta/wareejinta (Talaabada 4). Mulkiilaha cusub ayaa u baahan doona inuu soo gudbiyo codsiga cusub ee NOI (Talaabada 2). Marka codsiga ay ansixiyaan Gudiga Biyaha ee San Diego, lambarka cusub ee WDID ayaa lasoo saari doonaa, kadibna shaqooyinka dhismaha ayaa bilaaban kara.
- LRP waa inay xaqiisaa ayna soo gudbisaa Warbixinta Sanadlaha ah ugu danbayn Sibteembar 1 (sanadka warbixintu waa Luuliyo 1 – Juun 30).
  - Warbixinta sanadlaha ah ayaa u baahan inaad iskaa u soo sheegto wasaqda biyaha aan ahayn kuwa daadka, BMP-yada la dhaqan gashay, ciladaha BMP, iyo xogta kormeerka.
  - LRP ayaa ku dari kara QSD, QSP, iyo/ama qandaraasleyaasha oo ah Gudbiyaasha xogta nidaamka SMARTS si ay uga caawiyaan diyaarinta codsiga NOI iyo warbixinnada sanadlaha ah (Talaabada 2).

#### BMP-yada waxaa ku jira:

- xakamaynta nabaad guurka iyo jayga
- maaraynta tuurarka
- xasilinta ilinka/marinka



## TALAABADA 4 AAD GUDBI OGEYSIISKA JOOJINTA (NOT):

### ▶ Marka mashruuca la dhameystiro, waa inaad:

- Si rasmi ah u xasilisaa aagaga aan la marin adoo 70% ku beeraaya dhir ama adeegsanaaya [qaababka kale ee xasilinta goobta](#).
- Meesha ka saar dhammaan BMP-yada ku meel gaarka ah, sida xakamaynta banaanka iyo difaaca bud-dhigga.
- Ku soo gudbi NOT nidaamka SMARTS. Ku dar qariirada ugu danbaysa, sawirada mashruuca, iyo warbixinta kormeerka kama danbaysta ah ee NOT oo ay diyaarisay QSP. **Sii wad inaad dhaqan geliso SWPPP, ku dhaqanto shuruudaha CGP, aadna dhiibto qarashka sanadlaha ah ilaa NOT laga aqballo SMARTS.**

**Ogoow: in CGP mudadiiba mar wax laga beddelo, isbeddelada dhawaan la sameeyayna ay badeli karaan shuruudaha qabanaaya goobtaada.**

Wixii macluumaad dheeri ah iyo khayraad, fadlan la xiriir Gudiga Biyaha ee San Diego oo aad ka wacayso (619) 516-1990 ama booqo:

[https://www.waterboards.ca.gov/water\\_issues/programs/stormwater/construction.html](https://www.waterboards.ca.gov/water_issues/programs/stormwater/construction.html)

! Hel nuqulka oonlaynka ah ee warqadaan oo ka gal lifaaqyada dukumiintiga (qoraalka hooska ka xariiqan) halkaan: <https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/dpw/watersheds/DevelopmentandConstruction/CGP/>